(IB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Juun, 1988 L. 6

FAAFIN BIL SOO BAXA جريده شهريه

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar walba -- **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER SHARCI L. 3 ee 10 Maajo 1988, Abuurid Canshuurta Barnaamijka Telefishinka Bog; 411

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 23 ee 13.5.88, Magacaabid Nootaayo » 412

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 10 ee 11.5.88, Aqoonsi Ururka Samafalka Gargaarka Islaamka ee Bariga Afrika » 413

القانون رقم ١٠ في ١١-٥-٨٨ اعتراف لوكالة البر والاغاثة ٤١٤

DECREE MINISTER OF INTERIOR AFFAIRS, N. 10 on 11.5.88, Recognition of the Islamic Assistance. » 415

Wakaaladda Madhe...

## QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.1.87, Naado Dhul J/le Maxamed Sheekh Abuukar L. 282 » 416

DAWLADDA HOOSE MUQ. 5.1.87, Naado Dhul J/le Khadiija Maxamuud Caddow L. 283 » 417

DAWLADDA HOOSE MUQ. 5.1.87, Naado Dhul J/le Faaduma Jiinow Caddow L. 284 » 418

DAWLADDA HOOSE MUQ. 5.1.87, Naado Dhul J/le Munye Saciid Cumar L. 285 » 419

DAWLADDA HOOSE MUQ. 14.1.87, Naado Dhul J/le C/rashiid C/casiis Iimaan L. 286 » 420

DAWLADDA HOOSE MUQ. 14.1.87, Naado Dhul J/le Xaawo Muuse Cali L. 287 » 421

DAWLADDA HOOSE MUQ. 17.1.88, Naado Dhul J/le Faa'isa Xaaji Cumar L. 288 » 422

DAWLADDA HOOSE MUQ. 17.1.88, Naado Dhul J/le Maxamed Kamaaludin Xaaji L. 289 » 423

DAWLADDA HOOSE MUQ. 17.1.88, Naado Dhul J/le Cumar Xasan Maxamed L. 290 » 424

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Nado Dhul J/le Xasan Qaasim Jacfar L. 291 » 425

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Nado Dhul J/le C/casiis Iimaan Nuur L. 292 » 426

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.87, Nado Dhul J/le Xuseen Qaasin Jacfar L. 293 » 427

MAXKADADDA GOBOLKA W/GALBEED, 16.3.88, Lumid J/War. L. 0547940 ku qoran Cismaaciil Yuusuf Ismaaciil L. 297 » 428

MAXKADADDA GOBOLKA W/GALBEED, 23.4.88, Lumid J/War. L. 0361443 ku qoran Koos Nuur Haashin L. 298 » 429

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 14.5.88, Lumid J/War. L. 0656503 ku qoran C/laahi Xasan Afrax L. 299 » 430

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 1.5.88, Lumid 2 J/War. Ku qoran Cabdullaahi Jumcaale Abtidoon L. 300 » 431

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 24.5.88, Lumid 2 J/War. ku qoran C/lahi Cismaan Maxamed L. 301 » 432

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 26.5.88, Lumid J/War. L. 0326174 ku qoran Cabdalla Saalax Cabdalla L. 302 » 433

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 26.5.88, Lumid J/War. L. 0992137 ku qoran Sureer Cawil X. Cabdalla L. 303 » 434

MAXKAMADDA GOB. SANAAG, 20.4.88, Lumid J/War. L. 554239 ku qoran Saciid Axmed Guuleed L. 304 » 435

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.5.88, Lumid Jeeg War. L. 1120767 ku qoran Cabdullaahi Sheekh Axmed L. 305 » 436

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.5.88, Lumid Buug Kayd L. 13832 ku qoran Cabdullaahi Geedi Weheliye L. 306 » 437

MAXKAMADDA G. DEG. BERBERA, 23.5.88 Lumid Jeeg War. L. 1034010 ku qoran Maxamuud Maxamed Cawad L. 307 » 438

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0126395 ku qoran Ibraahim Xuseen Jaamac L. 208 » 439

**XEER SHARCI L. 3 ee 10 Maajo 1988, Abuurid Canshuurta Barnaamijka Telefishinka.**

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Sharci L. 14 ee 3.4.1962 Nidaamka Dhis maha Dawladda.

ISAGOO GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo Horumarinta T. Vga iyo arrimaha la xiriira.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

Laga billaabo maalinta Xeerkan Sharci Soo baxo, waxaa la abuuray Canshuurta Telefishinka oo ku waajibaysa ka faa' iideystayaasha Barnaamijika T.V.G.

Qodobka 2aad

Qiimaha Canshuurta ku xusan qodobka sare waa sh.so. 200 (laba boqol) bishii oo ku waajibaysa qoyskii qaba T.V., Waxaana la qaadayaa 3 bilcodba mar.

Qodobka 3aad

Uruurinta Dhakhliga waxaa u xilsaaran Laanta Uruurinta Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta ee Gobollada iyo Degmooyinka Telefishinka laga Daawado.

Qodobka 4aad

Qof kasta oo haysata T.V. waxaa waajib ku ah inuu soo saddeeyo Tirada T. Vyada ay haysato muddo bil ah gudaheed laga billaabo taariikhda xeer sharcigani dhaqan galo.

Qodobka 5aad

Qofkii ku xadgudba xeerkan sharci waxaa lagu ciqaaba vaa Ganaax la'eg toban (10) jeer canshuurtii uu la baxsaday

Qodobka 6aad

Xeer sharcigan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga iyadoo loo gudbinayo Golaha shacbiga si sharci loo gu rogo.

Muqdisho, 10 May. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

J/le Maxamed Siyaad Barre

**XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 28 ee 18.5.88, Magacaabid Nootaayo.**

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad.

ISAGOO AAKAY: Sharciga Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo Lr. 1 ee 2.3.1962 oo ku wada saabsan habeynta hawlaha Nootaa yada.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 7 ee 2.2.86, oo ku saabsan Mihnadda Nootaayada.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyay Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Ayadoo la tixgelinayo qodobka 2aad ee sharci Lr. 7 soo baxay 2.2.1986, laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo xeer kan J/le Dr. Aadan Cabdulqaadir Maxamed waxaa lagu ma gacaabayaa Nootaayo Xamar.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madax weynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi ga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18.5.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
J/le Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 10 ee 11.5.88, Aqoonsi Ururka Samafalka Gargaarka Islaamka ee Bariga Afrika.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73.

ISAGOO ARKAY: Warqad Lr. JDS/XH/C/1.1401/84 ee 21.6.84 ee Madaxweynaha J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Warqad Lr. WGD/65.1.85 ee 14.1.85 ee Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay ab uurista Ururada noocan ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Wakaaladda Samafalka iyo Gargaarka Islaamka ee Bariga Afrika oo ah Urur Samafal, ujeedadiisuna tahay inuu wax ka qabto dhibaatooyinka ku yimaad bulshada dhinacyada: Caafimaadka, Dhaqaalaha, Beeraha, Xoolaha, iyo Waxbarashada.

Qodobka 2aad

Ururka wuxuu saldhiggiisu noqonayaa Muqdisho, wuxuuna laamo ku yeelanayaa Gobollada iyo Degmooyinka.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 11.5.1988.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle)

اصدار رقم ١٠ ـ ١١ ـ ٥ ـ ٨٨ اعتراف لوكالة البر والاغاثة الاسلامية في شرق افريقيا

الوزير الشئون الداخلية

نظرا دستور جمهورية الصومال الديمقراطية

نظرا قانون تأسيس الوزارة الداخلية رقم ٣٠ المؤرخ ٣٠ـ٧ـ١٩٨٤

نظرا المادة ٥٤ ـ من القانون المدني الصومالي رقم ٣٧ من تاريخ ١٩٧٣/٦/٢

نظرا قانون تأسيس الوكالة الاغاثة الاسلامية في شرق افريقيا

نظرا ورقة رقم ج د ص/ رئيس/٤/٣ـ١٤٠١/٨٤ تاريخ ٨٤٦/٢١ من رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية.

نظرا ورقة رقم ٣/٦٥/١/٨٥ تاريخ ١٤/٩/٨٥ ١٩ من الوزير الشئون العدل والدينية

بموافقة الضرورة لتأسيس مثل هذه الوكالة

يصدر

المادة الاولى

اعتراف رسمي لوكالة البر والاغاثة الاسلامية في شرق افريقيا كهيئة اصناف المجتمع من نواحي الصحة والاقتصاد والزراعة وحرفات الداجنة والتعليم

المادة الثانية

مركز الادارى للوكالة يكون في مقديشو وتفتح فروع في المقاطعات وناحيات جمهورية الصومال الديمقراطية وشرق افريقيا.

المادة الثالثة

ينفذ هذا الاصدار عند توقيع الوزير الشئون الداخلية يصدر في الجريدة الرسمية للدولة .

الدكتور: محمد عبدالله بعدله

ـ وزير شئون الداخلية ـ

DECREE No. 10,11,5,88, Recognition of the Islamic Assistance and Relief Agency for Eastern Africa.

MINISTER OF INTERIOR AFFAIRS

HAVING SEEN: SDR Constitution;

HAVING SEEN: Law. N. 30 on 30.7.84 Institution of Ministry of Interior Affairs;

HAVING SEEN: Art. 54/2 Somali Civil Court N. 37 on 2.6.1973;

HAVING SEEN: Institution Law of the Islamic Assistance Relief Agency for Eastern Africa;

HAVING SEEN: Letter Lr. S.D.R./P.O./C/2-1401/84 from SDR President;

HAVING SEEN: Letter Lr. MJR/65/1/85 on 14.9.85 from Minister Justice & Religion;

GIVING CONSIDERATION: The importance of Such Agency Institution.

PROMULGATE

Art. 1

Officially recognized the Islamic Assistance and Relief Agency for Eastern Africa us assistance and Relief Organisation, which participing in sicuring relief and other essential service to the peoples on Healthy, Economic, Agriculture, Animal-husbandry and Education.

Art. 2

The Islamic assistance and Relief Agency for Eastern Africa, Its head Office will be in Mogadishu, and It will have branches in Regions and Districts, for Eastran Africa.

Art. 3

This promulgation will have execution effect after signature Minister of Interior Affairs and it will have publication on the Official Government Decree.

Mogadishu, 11.5.1988

MINISTER OF INTERIOR AFFAIRS
(Dr. Mohamed Abdulle Baadle)

QAYBTA SAD/XAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Sh. Abuukar iyo Muxyediin Sh. Abuukar uu u soo qortay Arji waaxda dhul ka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 28.11.1961 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Xamar Jeb Jeb Qaabkiisu yahay Rettan golare Addimihiisuna yihiin 7,80x4 kuna fadhiya mq. 31,20/

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddada Moosko.

Koonfur Waxaa ka xiga: Guriga Maxamuud Weheliye.

Galbeed Waxaa ka xiga: Luq yar & Cellka X. Macani.

B a r i Waxaa ka xiga: Guriga Maxamuu Weheliye.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

**Muqdisho, 4 Jan. 1987.**
AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
Jeom. Aadan Xaashi Nuur.

L. 282

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Khadiija Maxamuud Cadow uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 27.6.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 60x40 kuna fadhiya 2700 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Faaduma Jiinow

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad Kale.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 5 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
Jeom. Aadan Xaashi Nuur.

L. 283

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Faaduma Jiinow Caddow uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 23.6.80 uu ku weydiistay ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 60x45 kuna fadhiya 2700 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Khadiija Maxamuud

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad Kale

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 5 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
Jeom. Aadan Xaashi Nuur.

L. 284

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Munye Saciid Cumar uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 18.10.86 uu ku weydiistay ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Shibis Qaa bkiisuna yahay Trabesio Addimihiisuna yihiin 94,180,100,200 kuna fadhiya 10.705,10 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid

Koonfur Waxaa ka xiga: Jid

Galbeed Waxaa ka xiga: Jid

B a ri Waxaa ka xiga: Luuq

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 5 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
Jeom. Aadan Xaashi Nuur.

L. 285

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/lle C/rashiid Cabdulcasiis Jimaan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 20.12.86 uu ku wey diistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27x16,50 kuna fadhiya 445,50 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Jid

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
Jeom. Aadan Xaashi Nuur.

L. 286

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,
WAAXDA MAAMULKA DHULKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaawo Muuse Cali uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 17.10.86 uu ku weydiistay ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/casiis Qaabkiisuna yahay Trabesio Addimihiisuna yihiin (8÷6)x44 kuna fadhiya 308 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Gurigeeda hore

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada ganac

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
Jeom. Aadan Xaashi Nuur.

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Faa'isa X. Cumar Cambarow uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 24.2.85 uu ku weydiistay ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/casiis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 2x30 kuna fadhiya 240 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Gurigiisi hore

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada B. Qaasin

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
**Jeom. Aadan Xaashi Nuur.**

L. 288

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Kamaludiin X. Cali uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 6.8.86 uu ku weydiistay ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaa bkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 30x30 kuna fadhiya 900 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 289

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cumar Xasan Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 3.1.87 uu ku weydiistay ga bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Trabesio Addimihiisuna yihiin 14÷6x20= kuna fadhiya 200 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Maxamed Cismaan

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhulkii hore

B a r i Waxaa ka xiga: Wadada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 290

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xasan Qaasin Jacfar uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 17.6.85 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/casiis Qaab kiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 8x20 kuna fadhiya 160 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Gurigiisi hore

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada B. Qaasin

Galbeed Waxaa ka xiga: Jid

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Jan. 1787.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 291

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR.

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le C/casiis Iimaan Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 11.1.87 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaab kiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guriga Abuu Maye

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Wadada Dan Wadaag

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Jan. 1787.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR.
WAAXDA MAAMULKA DHULKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xuseen Qaasin Jacfar uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 17.6.85 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/casiis Qaab kiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 8x30 kuna fadhiya 240 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Gurigiisi hore

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada B. Qaasin

Galbeed Waxaa ka xiga: Jid

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Jan. 1987.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE.
J/le Aadan Xaashi Nuur.

L. 293

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEE HARGEYSA

UJ: Degreeto Cusboonaysiin J/War. ee Lumay Lambar ya hay 0547940 ee 30.12.87 sh.so. 30.000 ku qornaa Cismaan Yuusuf Ismaaciil Laga sameeyay Laanta Berbera.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cismaan Yuusuf Cismaaciil ee uu ku codsanaayo in loogu cusboonaysiiyo J/War. ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa ee 20.1.88 ee uu Bankigu u kala diray laamihiisa iyo Xisaabaha Guud.

MARKUU ARKAY: Xaashida Bankiga Ganacsiga iyo keyd ka Hargeysa ee lambar yahay 1497 ee 24.2.88, ee uu Ban kigu ku soo cadeeyey in uu Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyaha Astaamaha Ujeedada Sare ku xusan.

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay Ninka la yiraa Cismaan Yuusuf Ismaaciil.

MARKUU ARKAY: Qodobada 69,70 ee xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan la kansal ga reeyo, loona cusboonaysiiyo Ninka la yiraa Cismaan Yuusuf Ismaaciil, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama cidii awood buuxda ka haysta muddo 15 maalmood gudahood an ka dib marka Faafinta lagu soo saaro.

W A X A A

La farayaa maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aanka ku dhejiyo Bankiga Iridi hiisa si cidii haysata Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 16.3.88.

GUD/MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

Maxamuud Maxamed Ismaaciil

L. 297

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEE HARGEYSA

UJ: Degreeto Cusboonaysiin J/War. ee Lumay Lambar ya hay 0361443 ee 16.8.87 sh.so. 30.000 ku qornaa Koos Nuur Kooshin laga sameeyey L/1aad ee Hargeysa.

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee ay soo qoratay Faa'isa Ibraahim Maxamed ee 9.4.88 ee ay ku codsanayso in loo cusboonaysiiyo J/War. ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa ee 20.8.87, ee uu Bankigu u kala diray laamihiisa iyo Xisaabaha Guud.

MARKUU ARKAY: Xaashida Bankiga Ganacsiga iyo keyd ka Hargeysa ee lambar yahay 001634 ee 9.4.88 ee uu Ban kigu u soo cadeeyey in uu Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusani uu iska leeyahay Astaamaha Ujeedada Sare ku wada xusan.

MARKUU ARKAY: In Lacagta ku qoran Jeegaasi War. ee Lumay ee kor ku xusan ay iska leedahay Faa'isa Ibraahim Maxamed.

MARKUU ARKAY: Qodobada 69,70 ee xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan la kansal ga reeyo, loona cusboonaysiiyo Faa'isa Ibraahim Maxamed, cus boonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama cidii awood buu xda ka haysta muddo 15 maalmood gudahood ah.

WAXAA

La farayaa maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aanka ku dhejiyo Bankiga Iridi hiisa si cidii haysata Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 23.4.88.

GUD/MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

Maxamuud Maxamed Ismaaciil

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdullaahi Xasan Afrax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 0656503 Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed Laanta kuna jirto lacag dhan sh.so. 22.250 kuna qo ran magaca J/le C/laahi Xasan Afrax sida ku cad war qadda Lam. 4520 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed Qaybta Xisaabaad Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0656503 Ba nkiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 22.250 kuna qoran magaca J/le Cabd ullaahi Xasan Afrax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J/le C/laahi Xasan Afrax lacagta cadeyn tu tahay sh.so. 22.250 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran ma ikay ka soo wareegato muddo aan ka yareen 15 maalmood la ga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmi ga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 14.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

**Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.**

L. 299

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdullaahi Jumcaale Abtidoon.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumen Jeegaga War. Lam. kala yaha 0652452, 715674, laga sameeyay Bankiga Gana csiga iyo keydka Soomaaliyeed L/W/dhigley kuna jirto Lacag dhan midkiiba sh.so. 50.000. 17.500. kuna qoran magaca J/le C/laahi Jumcaale Abtidoon sida ku cad war qadda Lar. yahay 090 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) JJeegaga War. Lamb. kala yahay 0652452, 715674, Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/W/dhiigley kuna jirto lacag dhan midkiiba sh.so. 50.000, 17.500, kuna qoran magaca J/le Cabdullaahi Jumcaale Abtidoon.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley in ay siiso J/le C/laahi Jumcaale Abtidoon lacag ta cadeyntu tahay isgeyn sh.so. 67.500/= oo ah bedelkii J/W kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 1.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 300

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Cismaan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 0689108-0071331, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, kuna kala jirto min Sh. So. 500.000 iyo Sh.So. 17.500 kuna qoran magaca Cabdullaahi Cismaan Maxamed, sida ku cad warqadda Lr. 4853 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0689108-0071331, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan guud ahaan Sh.So. 67.500, kuna qoran magaca Cabdullaahi Cismaan Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo maaliyeed in ay siiso J/lle C/laahi Cismaan Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 67.500 oo ah bedel Jeegagga Wareega oo kor ku qoran, markay ka soo wareegto aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 301

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Mr. Captain Walter;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 0992137 ee laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Sureer Cawil X. Cabdalla sida ku cad warqadda Lam. 4998 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0992137 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Sureer Cawil Xaaji Cabdalla.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Mr. Captain Walter lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 303

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Mr. Captain Walter;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lr. 0326174 ee laga sameeyey L. Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdalla Saalax Cabdalla sida ku cad warqadda Lam. 4998 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0326174 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cabdalla Saalax Cabdalla.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Mr. Captain Walter lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 302

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

MGS/L. 127/88 20.4.1988

UJEEDDO: Bedelaad Jeeg Wareega L. 554239

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Sanaag Ceerigaabo

MARKUU ARKAY: Codsiga Tr. 3.4.88, ee uu Maxkamad daan u soo qortay J.le Siciid Maxamed Guuleed, isagoo ka codsaday Maxkamadaan in loo baafiyo Jeeg ka lumay;

HADDUU ARKAY: waxa uu ku saabsan yahay codsi-gaasi;

HHADDUU ARKAY: ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Ceerigaabo sida ku cad warqadda Sum. 53 ee 4.4.88, taasoo ay ku cadahay inuu lumay Jeegga Wareega Lr. 554329 kuna qorayd lacag dhan (20.000) Shilin iyo ma-gaca Maxamed Faarax Mataan, lacagta Jeeggaas ku qoreyd-na uu iska leeyahay Siciid Maxamed Guuleed, iyadoo laga baafiyey Jeeggaas B.G.&.K.S. L. Ceerigaabo Tr. 31.12.87;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N/2, lumid Jeeg Wareega.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo Jeeg War. L. 554239, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan (30) Beri, ka dib marka go'-aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saa-ro J.le Siciid Maxamed Guuleed ama qof isaga wakaalad sharci ah ka sita.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Sanaag Ceerigaabo
(Dr. Cabdiraxmaan Sh. Maxamed)

L. 304

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Sheekh Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 1120767 ee laga sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Bashiir Xuubeey Rooble sida ku cad warqadda Lam. 5135 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud kuna qoran Sh.So. 100.000.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1120767 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Bashiir Xuubeey Rooble.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Sh. Axmed Aadan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 305

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Geedi Weheliye;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lr. 13832 ee laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdul laahi Geedi Weheliye sida ku cad warqadda Lr. 00861 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xarunta kuna jirto Sh.So. 541.629.97;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 13832 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 541.629.97 kuna qoran magaca Cabdullaahi Geedi Weheliye.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Geedi Weheliye lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 541.629.97 oo ku qoran Buug Kaydka kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 306

MAXKAMADDA GOBOLKA/DEGMADA BERBERA

MGDB/17/88 23.5.88

UJEEDDO:- Lumid Jeegga War. Lr. 1034010 lacag dhan 100.000/Sh.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka/Degmada Berbera

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Axmed Maxamuud Maxamed (Gooþe) uuna ku codsanayey in loo caddeeyo Jeeggaasi kor ku qoran oo ka lumay;

MARKUU ARKAY: Baafinta Taarka ah ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Berbera kuna taariikhaysan 19.5.88 kuna caddahay in loo diray qaybahooda kala gedisan ...ojinta Jeeggaasi;

MARKUU ARKAY: Qod. L. 2 9.9.65-(2) waxaa caddaatay in Jeeggaasi Wareega ee lambarkiisu yahay 1034010 lacagtiisuna tahay 100.000/Sh. kuna qoran magaca Maxamuud Maxamed Cawad uu iska lahaa Axmed Maxamuud Maxamed kana lumay gacantiisa;

MARKUU ARKAY: Warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Berbera uu ku caddaynayo lumista Jeeggaasi.

SIDAASI DARTEED:- WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo mar labaad Jeeggaasi Wareega Lambar. yahay 1034010 lacagtiisu dhantahay 100.000/Sh. muddo 30 Beri gudahood, ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, haddaan lahayn qof sheegta waxaa gacanta laga saarayaa Axmed Maxamuud Maxamed oo isagu iska leh Jeeggaasi, 30ka beri waa in la sugaa.

Berbera, 23.5.1988

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka/Degmada Berbera
(Dr. Shawqi Cilmi Cali)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Deg./Berbera
(Sahal Dayax Weerar)

L. 307

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Cali Mire;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 0126395 ee laga sameeyey Laanta Ceerigaabo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Ibraahim Xuseen Jaamac sida ku cad warqadda Lr. 52208 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis_ Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0126395 jagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Ibraahim Xuseen Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Ceerigaabo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Cali Mire lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ku qoran Jeeg War. kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 208